

Service Agency
Address Line 1
Address Line 2
City, State Zip



Name
Address Line 1
Address Line 2
City, State, Zip

Date
Case Number

Kaalmadaada Caafimaadka (Medical Assistance, MA) way Joogsanaysaa. Tallaabo ayaa loo Baahanyahay.

Maxaan u helayaa warqaddan?

Uma qalmi doontid Medical Assistance (MA) laga bilaabo Oktoobar 1, 2026, sabab la xiriirta sharci federaal oo cusub. Haddii aad caawimo ka helayso Medicare Savings Program si aad u bixiso khidmadaha iyo kharashka Medicare, uma qalmi doontid caawimadan laga bilaabo Oktoobar 1, 2026. Sharciga cusub wuxuu isbeddel ku sameynayaa nooca xaaladdaha socdaal ee u qalmi kara barnaamijyadan. Xaaladaada socdaal ee aan faylka ku hayno laguma oggola sharciga cusub. Waxa aad ogeysiis joojin oo gaar ah ku heli doontaa boostada dhowaan.

Maxaan u baahanahay inaan sameeyo?

La xiriirta hay'adda ku qoran bidixda sare ee ogeysiiskan islamarkiiba si aad ugu wargeliso haddii:

- Xaaladaadda socdaal ay isbeddeshay.
- Aad hadda tahay muwaadin qaatay dhalashada Mareykanka (U.S. citizen) ama jinsiyada Mareykanka (U.S. national).
- Aad uur leedahay.

Haddii ay isbeddeladan dhaceen, waxaa laga yaabaa inaad weli u qalanto MA. Haddii aanay sidaas ahayn, waxaa laga yaabaa inaad u qalanto MinnesotaCare ama Emergency Medical Assistance (EMA) marka ay dhamaato kaalmadaada caafimaad (Medical Assistance, MA). MinnesotaCare waxay leedahay caymis dhammeystiran oo ay ku jirto booqashada dhakhtarka, daryeelka ka hortagga, daawooyinka dhakhtarku qoro, iyo adeegyo caafimaad ee kale. EMA waxay dabooshaa adeegyo xaddidan oo la xiriira keliya xaaladdo caafimaad oo degdeg ah.

Haddii aad rabto inaad codsato caymiska MinnesotaCare, samee mid ka mid ah kuwan soo socda:

- Booqo khadka tooska ah Sibteembar 1, 2026, ama wax yar kadib markaas si aad u codsato MinnesotaCare. Si aad u bilowdo codsigaaga khadka tooska ah, booqo <https://people.mets.dhs.mn.gov/universal/login>. Waxaad u baahan doontaa inaad abuurto ama

gasho koontadaada LoginMN kahor inta aanad codsan. Waxaa laga yaabaa in lagu weydiyo inaad xaqiijiso aqoonsigaaga si aad u abuurto ama u gasho LoginMN, ama

- Wac hay'adda ku qoran bidixda sare ee ogeysiiskan islamarkiiba oo weydiiso in lagu hubiyo u qalmitaanka MinnesotaCare. Waxaad bogga xiga ka heli kartaa xiriiriyaha lamabarada taleefanka hay'adda, ama
- Buuxi warqadan ku lifaaqan ee Supplement to the Minnesota Health Care Programs Application for Certain Populations (DHS-6696B) oo boostada ugu dir hay'adda ku qoran bidixda sare ee ogeysiiskan islamarkiiba.

Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg ah oo aad rabto inaad codsato Emergency Medical Assistance (EMA):

- Wac ama codsi qoraal ah u soo gudbi hay'adda ku qoran bidixda sare ee ogeysiiskan oo weydiiso in lagu hubiyo u qalmitaanka EMA.

Waxa aad taleefanka iyo cinwaanka hay'addaada ka heli kartaa Appendix B ee warqada ku lifaaqan Supplement to the Minnesota Health Care Programs Application for Certain Populations (DHS-6696B) ama khadka tooska ah halkan mn.gov/dhs/health-care/contact-us/county-tribal-directory/. Foomka DHS-6696B waxaa lagu heli karaa luuqaddo kale iyadoo la booqanayo mn.gov/dhs/about-us/forms-resources/edocs/.

Macluumaad dheeraad ah

Waxaad caawimo bilaash ah ka heli kartaa navigator (hage) Booqo www.mn.gov/dhs/navigators si aad u hesho hage ku sugan aagagga.

Ka wac Khadka Caawimada Refugee and Immigrant halkan 800-814-4806 si laguugu xiriiryo macluumaad, ilo iyo adeegyo waxtar leh ee bulshadaada. Booqo mn.gov/dhs/resettlement/helpline.

Si aad wax badan uga barato:

- Isbeddelada sharciga federaalka ee qaangaarka aan muwaadiniinta ahayn laga bilaabo Oktoobar 1, 2026, booqo <http://www.mn.gov/dhs/federalchanges/noncitizen-adults/>.
- MinnesotaCare, booqo mn.gov/dhs/minnesotacare.
 - Haddii aad u qalanto MinnesotaCare, waxaa laga yaabaa inaad bixiso khidmad caymis oo bille ah. Waxaad boostada ku heli doontaa ogeysiiska biilka.
 - Caymiskaagu wuxuu bilaabmayaa bisha ka dambeysa marka Minnesota Department of Human Services ay hesho lacagbixintaada khidmadaada caymiska. Tan macnaheedu waa si caymisku u bilaabmo Oktoobar 1, 2026, waa inaad bixisaa khidmadaada MinnesotaCare ugu dambeyn duhurka (12:00 duhurnimo) ee Sibteembar 30, 2026.
- EMA, booqo mn.gov/dhs/health-care/noncitizens/emergency-medical-assistance/.

Ka warran haddii aan su'aalo ka qabo ogeysiiskan?

La xiriir hay'adda ku qoran bidixda sare ee ogeysiiskan.

Haddii aad leedahay naafanimo maqal ama hadal, la xiriir hay'adda ku qoran bidixda sare ee ogeysiisan adiga oo isticmaalaya adeegga lalinta isgaarsiinta ee aad doorbidayso.